Kaarka talaallka COVID-19 ee Vax / Su'aalaha badanaa la iska waydiiyo MyIR Mobile

Waa maxay Kaarka Vax?
Vax Card (Kaarka Vax) waa diiwaanka rasmiga ah ee talaalkaaga COVID-19. Marka lagu talaalo, waa inaad heshaa kaar ay ku siinayso centers for disease control and prevention (CDC, Xarumaha Xakameynta iyo Kahortaga Cudurada) oo ay ku qoran yihiin taariikhaha talaalkaaga COVID-19 iyo nooca talaallka ee aad qaadanayso. Haddii aadan helin kaar ama uu kaa lumo, waxaa jira qaabab kale oo lagu caddeeyo inaad talaalka qaadatay (arag su'aalaha iyo jawaabaha hoose).

Maxaa loo qaadan karaa diiwaanka rasmiga ah ee talaalka?
Waxyaabaha soo socda waa tusaalayaasha diiwaannada rasmiga ah ee talaalka:

- Diiwaanka talaalka ee abadiyan ah/CDC Kaarka COVID-19 Vax
- Daabacaada Washington State Immunization Information System (Nidaamka Xogta Talaalka ee Gobalka Washington)
- Xogta daabacan ee MyIR (Ingiriis keliya) (midkood sawir ama Caddaynta Xaalada Talaalka)
- My IR Mobile (Ingiriis keliya) Caddaynta Talaalka COVID-19
- Foomka diiwaanka caafimaadka elektarooniga ah ee la oggolaaday oo kasoo baxay dhakhtarkaaga

Ma samaysan kartid kaarkaaga gaarka ah ee Vax. looma aqbali doono diiwaanka rasmiga ah ahaan. Diiwaannada rasmiga ah waa dukumiinti caafimaad oo la xaqiijiyay oo lasoo qaato xiliga talaallka, aadna ka helayso dhakhtarkaaga, ama aad ka helayso barta adeegyada MyIR ee kor ku qoran.

Sidee ayaan ku kaydinayaa Kaarkayga Vax?
Waa inaad Kaarkaaga Vax dhigataa meel amaan ah! U qaado kaarkaan sida shahaadadaada dhalashada ama baasaboorka. Sawir ayaad ka qaadan kartaa, waxaad ka samayn karaa sawir, waxaad gelin kartaa sajal (laakiin maaha kan orijinaalka ah), ama waxaad qaadi kartaa tallaabooyinka kale si aad u xaqiijiso inaad haysato koobiyadeeda.

Wixii tilmaamo dheeraad ah oo ku aadan maamulka wanaagsan ee Kaarkaaga Vax, waxaad xogtaan la wadaagi kartaa qoyskaaga iyo saaxiibadaa. Halkaan guji si aad u hesho waraaqda oo ku qoran luuqadaada: (hadda waxaa lagu heli karaa luuqadaha Ingiriiska iyo Isbaanishka).

Maxaan ugu baahan nahay inaan haysto Kaarka Vax?
Kaarkaaga Vax waa qaabka fudud ee aad ku caddaynayso in lagaa talaalay COVID-19. Waxaad u baahan kartaa inaad caddaynta talaalka keento si aad u safarto, uga qaybgasho munaasabadaha qaar, iyo inaad awoodo ku darista kuuro xoojin ah mustaqbalka.

Ganacsiyo badan oo ka jira Washington ayaa hadda sidoo kale bixinaya dhiiragelino loogu talagalay dadka cadeeya inay soo qaateen talaallka buuxa. Tan waxa aku jiri kara qiimo dhimisto, baay bilaash ah iyo kuraas gaar ah ood ka hesho munaasabadaha.

Maxaan samaynayaa Haddii aanan Helin Kaarka Vax markaan talaalka qaatay?
Haddii aadan helin kaarka Vax markaad qaadatay talaalka COVID-19, waxaad la xariiri kartaa cidda talaalka ku siisay. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa diiwaannada talaalkaaga COVID-19 barta www.MyIRMobile.com (Ingiriis keliya) aadna furato koonto bilaash ah.
Maxaan samaynayaa haddii Aan Xooro Kaarkayga Vax?
Haddii aad lumiso Kaarkaaga Vax, waxaad heli kartaa caddaynta talaalka COVID-19 oo uu ku siinaayo dhakhtarkaaga ama adoo ciwaan ka furanaaya www.MyIRMobile.com (Ingiriis keliya).

Waa maxay MyIR Mobile?
MyIR Mobile waa bar interneed ah oo dadka u sahasha inay arkaan diiwaannadooda rasmiga ah ee talaalka gobalka. Waxaad ciwaan ka furan kartaa www.MyIRMobile.com (Ingiriis keliya).

Fadlan xasuusnoow in MyIR Mobile ay hadda ku kooban tahay luuqada Ingiriiska Keliya. Si aad u hesho caawinaad xagga luuqadda ah, ama caawimaad dheeraad ah si aad u hesho diiwaannadaada, waxaad sidoo kale wici kartaa Gobolka Washington Office of Immunization and Child Profile (Xafiiska Tallaalka iyo Macluumaadka Carruurta) inta lagu jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah (360) 236-3595 ama iimayl ahaan ula xiriir waiisrecords@doh.wa.gov.

Sidee ayaan ku Helayaa diiwaanka talaalka COVID-19 ee cunugayga?
Waxaad helaysaa kaarkiisa gaarka ah ee CDC Vax marka la talaalo. Waa wax fiican inaad kaarka cunuga meel amaan ah u dhigto sida aad kaaga u xifdinayso oo kale. Arag liiska dookhyada kaydka ee kore.

Haddii aan cunugaagu haysan Kaarka CDC Vax, waxaad nuqulka rasmiga ah ka helaysaa dhakhtarkiisa carruurta ama cidda talaashay. Waxaad sidoo kale furan kartaa ciwaanka qoyska oo aad ka helayso www.MyIRMobile.com (Ingiriis keliya) kadibna waxaadna ku dari kartaa galka cunugaaga galkaaga shaqsiga ah.

Kawaran haddii laygu talaalay banaanka gobalka Washington?
Haddii aan lagugu talaalin gudaha gobalka Washington, diiwaannadaada talaalka waxaa laga yaabaa inaan lagu muujin MyIR Mobile. Fadlan xaqiiji inaad haysato caddayn kale oo la hubiyay oo talaalka COVID-19 ah, sida Kaarkaaga CDC Vax ama diiwaanno kale oo la hubiyay oo aad ka helayso dhakhtarkaaga.

Haddii aan lagugu talaalin gudaha Maraykanka, fadlan sido caddaynta rasmiga ah ee talaalka ee wadanka lagugu talaalay.

Sidee ayaan ku helayaa diiwaanadayda talaalka ee naftayda ama qoyskayga (maaha keliya talaalka COVID-19)?
Si aad u hesho liiska buuxa ee diiwaannada talaalka naftaada iyo xubnaha qoyskaaga, waxaad la xariiri kartaa dhakhtarkaaga ama waxaad ciwaan ka furan kartaa wa.MyIR.net (Ingiriis keliya).

Si aad u hesho caawinaad xagga luuqadda ah, ama caawimaad dheeraad ah si aad u hesho diiwaannadaada, waxaad sidoo kale wici kartaa Gobolka Washington Office of Immunization and Child Profile (Xafiiska Tallaalka iyo Macluumaadka Carruurta) inta lagu jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah 360-236-3595 ama iimayl ahaan ula xiriir waiisrecords@doh.wa.gov.

Washington State Department of Health

DOH 348-819 June 2021
Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-525-0127. Haddii aad tahay macaamiil dhagool ah ama aad maqal culus tahay, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl udir civil.rights@doh.wa.gov.